



PATIENT
EDUCATION

Tilmaamaha Nadiifinta Caloosha

Daraasadda Kaabsulaha Ee Bukaanka Aan La Dhigin Isbitaalka Golytely

Waa muhim in aad raacdo dhamaan talooyinka halkan lagu soo xusay si aad ugu diyaar garoowdo daraasadda kaabsulaha. Waa in uu maran yahay mindhicirkaaga yar, si uu dhakhtarku u arki karo sawirada uu soo qaado inta ay socoto daraasadda kaabsulaha.

Daraasadda Kaabsulaha Ee Bukaanka Aan La Dhigin Isbitaalka

- Way adag tahay in la gaaro oo lagu eego kaamarada mindhicirka yar. Dhakhaatiirtu waxa ay isticmaalaan kaabsulo loogu talo galay in uu sawiro ka soo qaado mindhicirka yar oo ay adag tahay in la gaari karo.
- Waxa aad liqeysaa kaabsulaha taasoo fududeyneysa in muuqaal laga soo qaado mindhicirka yar.
- Kaabsulaha yar waxa uu sawir ka qaadaa marka uu dhex maro mindhicirka yar. Waxa ay sawirada u dirtaa qalab jirkaaga lagu xirayo mudada ay socoto sawir qaadista.
- Kaamarada le'eg kiniiniga ee aad liqday dib looma isticmaalayo waxayna raaceysaa saxarada. Lagaama doonayo in aad meel dhigto.

Waxyaabaha aad iibsaneyso

- Si isugu diyaariso daraasadda mindhicirka yar, waxaa lagaa doonayaa in aad iibsato waxyaabaha halkan ku xusan oo lagu nadiifiyo caloosha.
- **Daawada in lagu qoro loo baahan yahay:**
 - La xiriir farmashiyaha aad daawada ka qaadato si ay kuugu diyaariyaan Golytely.
- **Looma baahna daawo dhakhtar kuu qoro**
 - Bac yaryar oo Crystal Light ah yaa kaa caawin kara in aad wanaajiso dhadhanka (aan aheyn casaan ama hurdi). (Waajib kuguma ah)

Xusuusinta daawada

- Waxaa laga yaabaa in loo baahdo in aad joojiso qaar ka mid ah daawooyinka aad qaadato ka hor daraasadda mindhicirka yar. Waa in aad la xiriirtaa dhakhtarka codsaday daawooyinka aad qaadato ugu yaraan todobaad ka hor balanta daraasadda mindhicirka yar. si uu kuu siiyo talada ku haboon.
- Fadlan la xiriir dhakhtarka la socda heerka sokorta jirkaaga ku jirta, inta aad ka qaadato insuliinta, ama daawooyinka sokorta si uu kuu siiyo talada ku haboon. Cuntada aad qaadaneyso ka hor diyaarinta caloosha waxaa laga yaabaa in ay saameyn ku yeelato inta aad ka qaadato daawada. Xusuusnoow in aad keento dhamaan daawada aad sokorta u qaadato maalinta aad leedahay balanta dhakhtarka

Hal (1) todobaad ka hor daraasadda kaabsulaha ee bukaanka aan la dhigin isbitaalka

- Jooji qaadashada daawooyinka xoojiya birta jirka ama daawo aan dhakhtar qorin oo aad u qaadato kordhinta birta.

Maalinta ka horeysa daraasadda kaabsulaha ee bukaanka aan la dhigin isbitaalka

- Jooji cabitaanka sigaarka 8da aroornimo. Waxaa laga yaabaa in aad joojiso cabitaanka sigaarka 24 saac ka inta aanay bilaabana daraasadda mindhcirka yar.
- 1da duhurnimo, jooji cunto cunista oo bilow in aad cabto daawada caloosha lagu nadiifinayo. Ku dar Golytely weelka oo dhan oo si wanaagsan u rux. Talaajadda geli Golytely.
- Biyaha cad waxaa ka mid ah:
 - Biyo, qaxwe madoow ama shaah (aan cadeys laheyn), Gatorade, biyo ubriya iyo kuwo aan ubrin (Coke, Isabarayt), casiir aan miro laheyn (tufaax, cinab cad, ,kanabaari cad), Jell-O, ama jalaatada popsicles. **Xusuusnoow HA CABIN CABITAAN CASAAN AMA MIDABKA HURDIGA AH.**
- Ha cunin wax cunto ah oo adag.
- Haddii aad jeceshahay in aad ku cabto iyada oo aan la qaboojin, waxa aad talaajadda ka soo saari kartaa 2 duhurnimo.
- Waxa aad ku dari kartaa baakad Crystall Light ah galaas kasta si aad u wanaajiso dhadhanka waxyaabaha aad isku dartay. Haku darin baraf cabitaanka aad isku dartay ee aad diyaarsatay.
- 4ta galabnimo bilow cabitaanka Golytely ee aad isku dartay. Waxa aad cabi kartaa oo kaliya laba liitar ama nus liitar cabitaanka aad isku dartay ee diyaarinta caloosha.
- Isku day in aad ku cabto koob qaada sideed wiiqiyadood 15kii daqiiqaba ilaa aad ka dhameyso labada liitar ama kala bar cabitaanka. Waxa ay kugu qaadanaysaa laba ilaa sadex saacadood ilaa aad dhameyso cabitaanka oo dhan.
- Waa in aad suuliga ka ag dhawaataa ka dib marka aad bilowdo cabitaanka aad isku dartay. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna u baahaneysaa in aad si degdeg ah u gaarto suuliga.
- Dadka qaar baa dareema yalaalugo ama lalabo, dibiro, ama matag inta ay cabayaan biyaha caloosha lagu nadiifinayo. Haddii ay sidaas kugu dhacdo, u naso 15-30 daqiiqo, ka dibna isku day in aad cabitaanka sii wado.
- **10ka fiidnimo cabitaanka biyaha cad. Daawada waxa aad ku kaban kartaa biyo cad oo kaliya.**
- Daadi nuska ka soo haray cabitaanka aad isku dartay.

Maalinta daraasadda kaabsulaha ee bukaanka aan la dhigin isbitaalka

- Daawada muhimka ah in aad qaadato waxa aad ku kaban kartaa biyo cad oo kaliya 6da aroonimo.
- Ha qaadan wax daawo ah wixii ka dambeeya 6da aroonimo maalinta daraasadda kaabsulaha.
- Ha cunin oo ha cabin wax daawo ah wixii ka dambeeya 6da aroonimo maalinta daraasadda lagu sameynayo mindhcirka yar.

Marka aad liqdo kaabsulaha ka dib

- Laba saac ka dib ayaa kaabsulahu bilaabaya hawshiisa.
 - Waxa aad cani kartaa biyo cad. Ha cunin wax cunto ah.
 - Ka fogoow dhamaan cabitaanka casaanka ama huriga ah.
- Afar saac ka dib marka aad liqday kaabsulaha daraasadda ayaa bilaabatay.
 - Waad qaadan kartaa daawadaada iyo cunto fudud.
 - Ha cunin hilibka cas.

Fariin/Tilmaamo gaar ah: _____

